

# TURVAPAIKAN HAKEMINEN CODSASHADA MAGANGELYO

## TURVAPAIKKAAKEMUKSEN JÄTTÄMINEN

Turvapaikkahakemus jätetään rajaviranomaisille tai poliisille. Turvapaikanhakijalta kysytään henkilö-tietoja sekä otetaan valokuva ja sormenjäljet ulkomaalaisrekisteriä varten. Lisäksi 14 vuotta täyttäneiden turvapaikanhakijoiden sormenjäljet tallennetaan Eurodac-järjestelmään. Järjestelmän avulla selvitetään turvapaikanhakijan oleskelut ja hakemukset muissa Euroopan maissa. Jos turvapaikanhakijalla on henkilö-tiedot, on tärkeää kertoa siitä.

## XERAYSASHADA CODSIGA MAGANGELYADA

Codsiga magangelyada lagu dalbanayo waxaa loo dhiibaa booliska ama qolyaha xadka ilaaliya. Qofka magangelyada codsanaya waxaa la weydiiyaa macluumaadka shakhsi ahaaneed, waxaana laga qaadaa sawir iyo faro loogu talagalay in la geliyo diwaanka dadka ajnebiga ah la geliyo. Waxaa intaa dheer in dadka magangelyada codsaday ee 14 sano u buuxsantay faraha laga qaaday lagu kaydiyo diwaanka Eurodac. Ka dibna iyadoo diwaankaas Eurodac la kaashanayo ayaa la soo baaraa in qofka magangelyada codsaday soo joogey ama codsiyo ka sameeyey waddamada kale ee Yurub. Qofka magangelyada codsanaya hadduu wato caddayn aqoonsi ah inuu sheego waa muhiim.



## DUBLIN-MENETTELY

Dublin-menettelyssä päätetään, mikä maa on vastuussa turvapaikkahakemuksen käsittelystä. Euroopan Unionin jäsenmaat sekä Norja, Islanti ja Sveitsi ovat sopineet, että turvapaikanhakijan hakemus käsitellään vain yhdessä maassa. Turvapaikkahakemus voidaan siirtää käsiteltäväksi toiseen maahan, jos

- turvapaikanhakija on hakenut turvapaikka aikaisemmin siitä maasta
- turvapaikanhakijan perheenjäsen oleskelee laillisesti siinä maassa
- turvapaikanhakijalla on sen maan myöntämä oleskelulupa tai viisumi
- turvapaikanhakija on tullut sen maan kautta laittomasti Suomeen.

Maahanmuuttovirasto voi myös päättää käsitellä hakemuksen Suomessa. Dublin-menettely ei yleensä koske alle 14-vuotiaita turvapaikanhakijoita, vaan heidän hakemuksensa käsitellään yleensä Suomessa.

## NIDAAM FULINTA DHABLIN

Nidaam fulinta Dhablin baa waxay tahay in go'aan laga gaadho waddanka u xilsaaran inuu falanqayn ku sameeyo (go'aan ka gaadho) codsiga magangelyada. Waddamada Midowga Yurub, Norway, Aysland iyo Iswiisland baa waxay ku heshiyeen in qofka magangelyocodsadaha ah codsiigisa lagu falanqeyo oo go'aan lagaga gaadho hal waddan oo keliya.

- Codsiga magangelyada waxaa waddan kale in lagu falanqeyo loo wareejin karaa,
- haddii qofka magangelyada codsaday uu mar hore waddankaas magangelyo ka codsaday
  - haddii qofka magangelyada codsaday qof qoyskiisa ah uu si sharci ah u joogo waddankaas
  - haddii qofka magangelyada codsaday uuhaysto sharci ama fiise uu waddankaasi siiyey
  - haddii qofka magangelyada codsaday uu waddan kaas soo maray oo Finland ku yimi sharci darro

Hase yeeshee Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanku wuxuu go'aan ku gaadhi karaa in codsiga lagu falanqeyo Finland. Nidaam fulinta Dhablin ma saamayso sida caadiga ah dadka magangelyada codsaday ee 14 sano ka yar. codsigooda caadi ahaan Finland baa lagu falanqeyaa.



## TURVAPAIKKAKUULUSTELU

Kuulustelussa poliisi selvittää turvapaikanhakijan henkilö-tiedot sekä sen, mitä kautta ja miten turvapaikanhakija tuli Suomeen. Kuulustelussa kysytään myös perheenjäsenten tietoja. Poliisi tekee kuulustelun tulkin välityksellä. Alaikäisen turvapaikanhakijan kuulustelussa on läsnä aina edustaja ja mahdollisesti avustaja.

## WARAYSIGA MAGANGELYADA EE BOOLISKU QAADO

Boolisku wuxuu waraysigan magangelyada ku baaraa qofka magangelyada codsaday qofku yahay (magaca iwm.) iyo meelaha uu soo maray iyo siduu Finland ku yimi. Waraysiga waxaa kaloo qofka lagu weydiiyaa dadka qoyskiisa ah macluumaadkooda. Boolisku markuu qofka waraysanayo turjubaan buu isticimaalaa. Qof aan qaangaar ahayn oo magangelyo codsaday marka la waraysanayo waxaa mar walba goobjoog ah wakiil (edustaja) iyo hadday suurowdo caawiye.



## HAKEMUS KÄSITELLÄÄN SUOMESSA

Jos hakemus käsitellään Suomessa, tekee Maahanmuuttovirasto turvapaikkapuhuttelun.

## CODSIGA FINLAND BAA LAGU FALANQEEYAA

Hadday noqoto in codsiga Finland lagu falanqaynayo, Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanku waraysi magangelyada ah buu la yeeshaa qofka.

## HAKEMUS KÄSITELLÄÄN TOISESSA MAASSA

Jos Maahanmuuttovirasto päättää käännyttää turvapaikanhakijan toiseen Euroopan Unionin jäsenmaahan, Norjaan, Islantiin tai Sveitsiin, voi päätöksestä valittaa oikeuteen. Edustaja ja avustaja auttavat alaikäistä turvapaikanhakijaa valituksen tekemisessä.

## CODSIGA WAXAA WADDAN KALE LAGU FALANQEEYAA

Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanku hadduu go'aan ku gaadho in qofka magangelyada codsaday lagu celiyo waddan kale Midowga Yurub ah, Norway, Aysland ama Iswiisland, go'aanka waa laga dacwoon karaa oo maxakamada ayaa loo dacwoon karaa. Go'aanka sida looga dacwoodo waxaa qofka aan qaangaarka ahayn ee magangelyada codsaday ka caawiya qofka wakiilka u ah iyo caawiyaha.

## TURVAPAIKKAPUHUTTELU

Maahanmuuttoviraston turvapaikkapuhuttelussa selvitetään miksi turvapaikanhakija on lähtenyt kotimaastaan tai pysyvistä asuinmaastaan ja miksi hän ei voi palata sinne. Puhuttelussa selvitetään perusteet turvapaikalle tai muille oleskeluluville. Puhuttelu on turvapaikkamenettelyn tärkein haastattelu. Puhuttelija tekee haastattelun tulkin välityksellä. On erittäin tärkeää, että turvapaikanhakija kertoo puhuttelijalle asiat oikein ja kokonaan. Alaikäisen turvapaikanhakijan puhuttelussa on läsnä aina edustaja ja mahdollisesti avustaja. Myös sosiaalityöntekijä voi olla mukana puhuttelussa.

## WARAYSIGA MAGANGELYADA

Waraysiga magangelyada ee Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanku qofka la yeesho ayaa lagu baaraa sababta uu magangelyo-codsaduhu uga soo tegey waddankiisii ama waddanka uu joogtada u deggenaa, iyo sababta aanu ugu noqon karin. Waraysiga waxaa lagu baaraa waxyaabaha salka u ah magangelyada ama noocyada kale ee sharciyada deggenaanshaha. Waraysiga Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanku waa waraysiga ugu muhiimsan ee nidaamka magangelyada. Qofka wax waraysanayaa isagoo turjubaan isticimaalaya ayuu qofka waraystaa. Waxaa amuhiim ad u ah in qofka magangelyada codsaday uu arimaha si sax ah ugu sheego qofka waraysanaya oo aanu waxba ka tegin. Qofka aan qaangaarka ahayn ee magangelyada codsaday marka la waraysanayo waxaa mar walba goobjoog ah wakiil iyo hadday suurowdo caawiye. Waxaa kaloo dhici karta inuu qofka sooshalka ahna joogo waraysiga.



## LISÄSELVITYKSET

Poliisi, Rajavartiolaitos tai Maahanmuuttovirasto voi vaatia:

### län selvittämistä.

Turvapaikanhakijan ikää arvioidaan tutkimalla hampaita ja ranneluuta lääketieteellisesti.

### Kielitestiä,

jolla selvitetään minkä alueen murreta turvapaikanhakija puhuu.

Turvapaikanhakija voi antaa Maahanmuuttovirastolle selvityksiä esimerkiksi terveydentilastaan. Edustaja ja avustaja auttavat turvapaikanhakijaa selvitysten hankkimisessa.

## BAARITAANNO DHEERAAD AH

Booliska, Hay'adda ilaalinta xadadka ama Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanku waxay dalban karaan

### In da'da la baaro.

Qofka magangelyada codsaday waxaa la qiyaasi karaa da'diisa iyadoo ilkihiisa iyo lafta lagu samayno baaritaan dhakhtar samaynayo.

### Baaritaan luuqadda ah

oo la rabo in lagu baaro qofka magangelyada codsaday deegaanka uu lahajdiisa ku hadlayo.

Qofka magangelyada codsaday wuxuu Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanka u gudbin karaa caddaymo ku saabsan tusaale ahaan xaaladda caafimaadkiisa. Qofka wakiilka ah (edustaja) iyo caawiyaha ayaa qofka magangelyada codsaday ka caawiya siduu caddaymaha ku heli lahaa.



## PÄÄTÖS

Maahanmuuttoviraston päätös perustuu turvapaikanhakijan antamiin tietoihin sekä lisäselvityksiin, joita turvapaikanhakija on esittänyt tai viranomaiset ovat pyytäneet. Ratkaisuun vaikuttavat oleellisesti tiedot asuinmaasta ja sen ihmisoikeustilanteesta.

## GO'AAN

Go'aanka Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanku wuxuu ku salaysan yahay qofka magangelyada codsaday waxyaabaha uu sheegay iyo faahfaahimaha dheeraadka ah ee uu isagu keensaday ama shaqaalaha dowladdu ka dalbadeen inuu keeno. Go'aanka la gaadhayo waxaa saamayn weyn ku yeesho wararka ku saabsan qofku waddankuu deggeenaan jirey iyo xaaladda xuquuqda bini aaddanka ee waddankaasi ka jirta.

## PÄÄTÖKSEN TIEDOKSIANTO

Poliisi kutsuu alaikäisen turvapaikanhakijan ja edustajan kuulemaan Maahanmuuttoviraston päätöksen. Päätös annetaan tulkin välityksellä.

## U SHEEGIDDA GO'AANKA

Booliska ayaa u yeera qofka aan qaangaarka ahayn ee magangelyada codsaday iyo qofka wakiilka u ah, si loogu sheego go'aanka uu Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanku soo gaaray. Iyadoo turjubaan uu turjumayo ayaa qofka la siiyaa go'aanka.

## PÄÄTÖKSESTÄ VALITTAMINEN

Turvapaikanhakijalla on oikeus hakea päätökseen muutosta. Edustaja ja avustaja auttavat alaikäistä turvapaikanhakijaa valituksen tekemisessä oikeuteen.

## IN GO'AANKA LAGA DACWOON KARO

Qofka magangelyada codsaday wuxuu xaq u leeyahay inuu dalban karo in go'aanka laga beddelo. Qofka aan qaangaarka ahayn ee magangelyada codsaday go'aanka inuu ka dacwoodo waxaa ka caawiya qofka wakiilka u ah iyo caawiyaha.



## MAJOITUS

Vastaanottokeskukset ovat turvapaikanhakijoille tarkoitettuja majoituspaikkoja, joissa asuminen on ilmaista. Vastaanottokeskuksen työntekijät huolehtivat arjesta ja turvapaikanhakijalle tarjottavista palveluista.

Alaikäinen turvapaikanhakija voidaan majoittaa myös yksityismajoitukseen sukulaisperheen luokse. Vastaanottokeskus selvittää perheen tilanteen ennen majoittamista. Perhe huolehtii turvapaikanhakijan arjesta, ja vastaanottokeskus järjestää muut palvelut.

## KOULUNKÄYNTI

Vastaanottokeskus järjestää alaikäisille turvapaikanhakijoille suomen tai ruotsin kielen opetusta.

## TYÖNTEKO

Turvapaikanhakijalla on oikeus tehdä työtä oleskeltuaan Suomessa tietyn ajan.

## TOIMEENTULOTUKI

Alaikäinen turvapaikanhakija saa toimeentulotukea vastaanottokeskuksesta.

## EDUSTAJA

Vastaanottokeskus järjestää alaikäiselle yksintulleelle turvapaikanhakijalle edustajan.

## HOY

Xeryaha qaxootigu waa meelo loo hoydo oo loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey inay lacag la'aan ku deggenaadaan. Shaqaalaha xerada qaxootiga ka shaqeeyaa waxay u xilsaaran yihiin waxyaabaha maalin walba jira ee noloshaha ah iyo adeegyada la siiyo dadka magangelyada codsaday.

Qofka aan qaangaarka ahayn ee magangelyada codsaday waxaa iyana loo ogoalan karaa inuu la deggo qoys ay qaraabo yihiin. Xerada qaxootiga ayaa marka hore intaan ilmaha lala dejin qoyska, soo ogaata xaaladda qoyska. Qoyska uu ilmuhu la deggen yahay ayaa u xilsaaran waxyaabaha caadiga ah maalin walba jira ee ilmaha noloshiisa ah, xerada qaxootiguna waxay u xilsaaran tahay qabanqaabinta adeegyada kale.

## ISKUUL DHIGASHO

Xerada qaxootiga waxay qofka aan qaangaarka ahayn ee magangelyada codsaday u qabanqaabisaa waxbarasho luuqadda Finnishka ama Iswiidhishka ah.

## SHAQAYSASHO

Magangelyo codsadaha waxuu xaq u layahay in uu saqeeso markii uu joogo Finland waqti go'an.

## TAAGEERADA DHAQAALAH NOLOSHA

Qofka aan qaangaarka ahayn ee magangelyada codsaday xerada qaxootiga ayuu ka helayaa taageero dhaqaale oo uu ku noolaado.

## WAKIILKA

Qofka aan qaangaarka ahayn ee keligii yimi ee magangelyada codsaday xerada qaxootiga ayaa u samaysa qof wakiil u ah